# Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad**
**Documentiga Kulankii 20aad** **Taariikhda: 03/05/2014**

**Kalfadhga 4aad**
**Kulankiisii 20aad**
**Saacada la furay: 11:40 am**
**Saacada la xiray: 12:45 pm**
**Guntanka: 178 xildhibaan**

**Ajendaha:**

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Hadal jeedin Raii'sul Wasaaraha ee ku aadan soo Bandhigidda Barnaamijka Xukuumadda oo Tafatiran**
4. **Iyo wixii kale oo howl ah**

**Shir-Guddoonka**: Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Baarlamanka Mudane Jeylani Nuur Iikar

Waxaa shirka furey Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Baarlamaanka Mudane Jeylani Nuur Iikar, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyey Xildhibaan: Sheekh Shaacir.Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada uu weydistey in ay ansixiyaan Ajendaha weyna ansixiyeen.Guddoomiyaha ayaa sheegey 03/05/2014, in ay tahay maalinta saxaafada aduunka hambalyo ayaan u dirayaa dhamaan saxaafada

soomaaliyed Meel Kasto ay ku nool yihiin. Waxaan leeyahay hambalyo, hambalyo Waxaan ku boorinayaa in ay howshooda sii wataan.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa waxa uu soo jeediyey, in 16 xildhibaan ay soo jeediyeen codsi ku saabsan haweeney soomaaliyeed oo uur laheyd in ay iska soo tuurtey dabaq sare daaqadiisa iyadoo ay u soo galeen guriga boliska Kenya iyadoo ka jabtey dhabarka, hadaba xildhibaanadaas waxey sheegeen dhaqaatiirtii la la xiriirsiiyey gabadhaas in ay sheegteen qarash badan, iyada-na ayna awoodin, hadaba xildhibaano waxaan idiin soo jeedinayaa, in aad ku caawintaan qofkiiba in uu siiyo $20, si dhaqtarka looga bixiyo.Guddoomiyaha ayaa waxa uu ku soo dhaweeyey Ra'iisul Wasaaraha J.F.S.

**Hadal jeedintii Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federalka Soomaliya**

**Mudane CabdiWeli Sheekh Axmed Maxamed**

Waxaan idiinku salaamayaa salaamu caleykum waraxmatulahi wa barakatu, waa markii sadexaad ee aan hortiina imaado, waxaan idiinka balanqaadey qorshaha xukuumada oo tafatiran, iyadoo aan ka ambaqaadayo go'aanka Golaha Wasiirada ee tix-raaciisu yahay **SHGW.00.18.03.14 ee 27/03/2014** oo Golaha Wasiirada ay cod-buuxa ku ansixiyeen barnaamijka ay xukuumadu ku howl-gali doonto sanadka 2014.

Sidaa darted, waxaan halkaan si xushmad iyo qaddarin leh kuugu soo gudbi-neynaa barnaamijka xukuumadu ku howlgali doonto 2014-ka, si aad ugu gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

Waxaan ku faraxsanahey in aan soo bandhigo Qorshaha shaqo ee 2014 ee xukuumadeydda,Qorsho howleedkan waa mid ku qotomo diiradana saaraya howl-gallada sugida amniga dalka ku shaqeynta siyaasad loo wada dhanyah-ay, dib-uhabaynta garsoorka, bulshada oo la gaarsiiyo adeeg dhisaya hey'ada-ha qaranka,soo kabasho dhaqaale iyo kobcin dakhli, arimahaas oo dhamaan waafaqsan howlaha dowlada federalka ahmiyadda kowad ay siineyso .

Qorshahan shaqo waxa uu kale uu waafaqsan yahay, qorshaha kobcinta dhaqaale iyo hiigsiga cusub oo ay ku hishiiyeen soomaaliya iyo deeq bixiyayaasha Waxaan garwaaq sanahay in ay adagtahay in la gaaro hadafkeena horu marineed oo dhan hadii aan lasii dar-dar galin howlaha sugida amniga, taas ayaa keentey in xukuumada ay qoondeyso 40%, miisaaniyadda dowlada

Hadafka amniga oo ugu muhiimsan waa xasilinta dalka iyo xidido u siibida shabakadaha argagixisada, sida lagu gaari karo waa soomaaliya oo xasilan, nabadna ah waa siyaasad dadka ururineyso oo loo dhan yahay, xuku madeyduna si weyn ayey arintaas ugu go'antahay soomaalida oo dhan waxa ugu baaqaya in dowlada federalka kala qeyb galaan hergalinta is afgarad Siyaasadeed kana qeyb qaataan dib ueegista Dastuurka gacana ka geystaan dhismaha maamul goboleed la isla ogol yahay ,Qorsho howleedka 2014 ka wuxuu xambaarsan yahay is fahan siyaasadeed oo maslaxadoon ah iyo helida wadajirka bulshadeena.

Xukuumadeyda, waa ay ka go'an tahay in ay horseedo dib uhabeynta hay"adaha garsoorka. si loo hanto kalsoonida shacabka ee hay'adaha cadaalada,Dib-u-habeynta garsoorka waa qodob laf –dhabar u ah istiraatijiyadda aan ku dooneyno in la helo garsoor dhab ah oo loo siman yahay qofna qofka kale in uu ka sareyn sharciga hortiisa, sidoo kale xukuumada waxey u howl galeysaa in ay kor u qaado awooda dowlada ee u khidmeynta iyo kor u qaadida nolasha dadkeena, taasina waxaa lagu heli karaa ballaarinta dhaqaalaha, dib udhiska kaabayaalka dhaqaalaha iyo ka faa'ideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee dalke-ena qorshahan shaqo ee 2014 wuxuu ku tala galayaa ku tiirsananta aragtida dheraadka ah iyo xoog furnaanta ganacsi ee dadkeena kuwaas oo sahli kara kobac dhaqaale oo waara, sameynta hey'ado qaran oo hufnaan iyo karti leh ayaa ka mid ah mudnaanaha barnaamijkaan shaqo.

Silooga hortago ku xad gudubka xuquuqda bini'aadanka, xukuumadeydu waxay u taagan tahay ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta oo dhan, gaar ahaan haweenka iyo caruurta, taasna waxaa lagu gaari karaa in wada shaqeyn buls-hada dhexdeeda ah dhidibada loo aaso, ayna dhamaato la xisaabtan la'aanta dadka gabood falada lagu sameynayo, isla markaana lagu mintido sareynta sharciga iyo ku dhaqanka diinta, muhiimad ayaan u aragnaa kaalinta beesha caalamka iyo taageeradooda.

Xukuumadu qorshe sanadeedkeda 2014, waxey xoojineysaa iskaashiga iyo wax wada qabsiga beesha caalamka, saaxiibadeen beesha caalamka waxaan ugu baaqeynaa in ay oo fiyaan balla-mihii ay hore u balan qaadeen ayna tag-eerayaan hirgalinta qorshe howleedkan 2016ka.

Kalsoonida shacabka iyo taageerada Golaha shacabka ayaa fure u ah gaarida Hiigsiyada ku tilmaaman qorshaha shaqo ee 2014, dalkeena gudihiisa si loogu diyaar garoobo dhismaha maamul goboleed ku meel gaar ah in lala tashto siyaasiyiinta, odayaasha, dadka deegaanka, saakey waxaan 18baa-buur isugu duba ridney oo macaawino ah Bay-Bakool oo ka soo yeertey xaalad Qatar ah.

Xukuumada waxey qaadeysaa howlgalo, ilaa hada waxaa laga saarey 9gobol kooxaha nabad diidka ah, waxaan dhawaan gacanta ku soo dhigeynaa gobola-da noo harsan, waxaa la tayeysiinayaa ciidamada X.D.S. waa in laga hortagaa askareyta caruurta yar-yar oo looma adeegsan karo dagaalada.

Wasaarada warfaafinta waa in ay ka sameyso barnaamij wacyi gali ah indad-weynaha ay ka soo qeyb galaan Dastuurka qabyo qoraalka ah, waa in ay beesha caalamka ay ka qeyb qaadato bixinta qarashka iyo tababarada howlaha adeega, waxaa la ururinaayaa dib u habeen beeraha, xoolaha,waxaa la ruqseynayaa shirkadaha gaarka loo leeyahay, waxaa la dhisayaa suuq geynta xanaanada xoolaha iyo sheybaarada xoolaha, waxaa laga hortagayaa kalluumeysiga sharcidarada ee leyska guranaayo, waxaa la xoojinaya macdanta iyo Badroolka wey bilowdeen waan idiin soo gudbinayaa maalgashadka dowladaha shisheeye wey socotaa, waxaan dib u dhiseynaa korantadii iyo biyihii oo dadweynaha runtii ay cabasho ka muujiyeen xaga korantada oo qaali ku ah.

In lagu talo jiro howlgal lagu tayeynayo jidadka iyo kaabayaasha dhaqaale, Garoonka Aadan Cade, oo dhismo lagu bilaabayo, Sidoo kale in aan Dekada dib u casriyeyno iyo ururinta canshuuraha bariga iyadoo la dhisaayo hanan daahfuran waxaa la magacaabey (Hanti dhowraha Qaranka iyo Xisaabiye Guud) ee dowladda. Waxaan rabaa xildhibaano xukuumada aan aniga hurmoodka u ahey in ay yeeshan wada shaqeyn, waxaa na horyaala howlo aad u balaaran oo ah in ay wada shaqeyaan guddiyada Baarlamaanka iyo wasaaradaha.

Intaa ka dib Raii'sul Wasaaraha oo soo gaba-gabeyey hadal jeedintiisii. Guddoomiyaha ayaa sheegey, in Raii'sul Wasaaraha uu codsadey in maalinta taladada uu halkan ka soo jeedin doono Miisaaniyadda 2014 ka. Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada u soo jeediyey, manta in hal ajende oo kaliya in aan la heyn.

**Shir Guddoonka,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Baarlamaanka Mudane Jeylani Nuur iikar, oo shir Guddoominayey kalfadhiga 4aad kulankiisii-20aad, waxa uu sheegey in uu shirku xiran yahay saacad markey aheyd 1:45 pm.**